Faallo Kooban 02

Abriil 2019

Soo koobid

Bishii Oktoobar 2018, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa la wareegtay maamulidda 24 iskuul dowladeed oo ku yaalla magaalada Muqdishu. Dowladda ayaa shaqaaleysiisay si toos ahna mushaar u siisa macalimiinta iskuullada, ardayda heerarkooda kala duwanna (1-12) wax lacag ah lagama qaado. 24-ka iskuul ayaa ah dugsiyadii ugu horreeyay oo ay dowladda federaalka ah maamusho tan iyo markii ay dowladdii dhexe burburtay sanadkii 1991-dii. Faalladan kooban waxa ay ku saleysan tahay booqasho lagu tagay iskuullada iyo wareysiyo lala yeeshay daneeyeyaal kala duwan ee dugsiyada dowladda. Waxa ay taxliilineysaa ardayda, macallimiinta, mushaar bixinta, manhajka, iyo caqabadaha heysta iskuullada. Waxa ay qormada kusoo gunaanadeysaa talooyin tixgelin mudan.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.com

© 2019 Somali Public Agenda

Qiimeyn dugsiyada dowladda ee Muqdisho

Raad-raac

Iskuullada dowlada waxa ay kamid ahaayeen xarumihii dowladda ee burburay kadib markii la ridey dowladii militeriga sanadkii 1991. Bartamahii 1990-maadkii waxaa bilowday dib-u-yegleelidda dugsiyo waxbarasho iyadoo aanay jirin dowlad dhexe oo shaqeyneysa (Cassanelli & Abdikadir, 2008). Wakhtigaas wixii ka dambeeyay waxaa soo batay iskuullada gaarka loo leeyahay oo laga furayay guud ahaan Soomaaliya. Iskuulladaan ayaa waxbarashada heer hoose, dhexe iyo sare oo aad loogu baahnaa siiyay caruurta iyo dhalinyarada ku nooleyd magaalooyinka dalka oo ay dhibaatooyin iyo qalalaaso badan ka jireen.

Dowladdii kumeelgaarka ahayd ee Soomaaliya ugu horeysay waxa sanadkii 2000 lagu aasaasay dalka Djibouti kadib 10 sanno of fowdo iyo sharci darro lagu jiray. Nasiib darro waxa ay dowladdaas ku guul-darreysatay in ay ku shaqeyso dalka gudihiisa. Waxaa xigay labo dowladood oo jilicsan oo kumeelgaar ahaa lana dhisay sanadihii 2004 iyo 2009. Dowladdii federaalka ahayd ee ugu horeysay ee aan kumeelgaar ahayn waxaa lagu yegleelay Muqdishu bishii Sebteembar sanadkii 2012 kadib markii ay baarlamaanka federaalka ee Soomaaliya u doorteen Xasan Sheikh Maxamuud madaxweynaha dalka. Inkastoo ay horumarradan jireen, dowladihii is-xig-xigay wax badan kama aanay qaban waxbarashada. Iskuullada gaarka loo leeyahay iyo dalladaha ayaa ahaa welina ah kuwa ugu badan ee saameynta ku leh waxbarashada heerka asaasiga ah, dugsiyada sare iyo jaamacadaha ku yaalla Soomaaliya.

Dowladda Federaalka ayaa iyadoo taageero ka heleysa hay'ado caalami ah bilaawdey mashruuca Aada Dugsiyada (Go-to-School) sannadkii 2013-dii iyadoo uu yoolku ahaa in fursad waxbarasho la siiyo hal malyan oo caruur iyo dhalinyaro Soomaaliyeed ah muddo saddex sanno gudahood (Federal Government of Somalia & UNICEF, 2013). Mashruucan ayaa noqday mid aanan laga gaarin hiigsigiisii, gaar ahaan gobollada dhaca bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya. Macalimiintii si joogto ah mushaar uma aanay helin, tirada ardaydii la qorsheeyayna lama diiwaangelinin.

Dowladda federaalka ayaa bilowday dadaallo ay kula wareegeyso tiro iskuulo dowladeed ee magaalada Muqdisho ku yaalla. Deeq bixiyeyaal caalami ah iyo dalal kale ayaa taageeray dib-u-dayactirka tiro iskuullo dowladeed ah. Iyadoo ay jirto xaqiiqda ah in 45 boqolkiiba miisaaniyadda dowladda ay bixiyaan deeq bixiyeyaal caalami ah, haddana dowladdu waxa ay sare u qaadday qoondada miisaaniyadda ee waxbarashada iyadoo gaarsiisay $16 malyan sanadka 2019, marka loo eego $8 malyan oo loo qorsheeyay sanadkii ka horreeyay (Federal Republic of Somalia, 2019). Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dowladda Federaalka ayaa ka heleysa $10.4 malyan miisaaniyada 2019. Qeyb kamid ah lacagtan ayaa ku bexeysa iskuullada dadweynaha oo ay dowladdu maamusho (Somali Public Agenda, 2019).

Bishii Oktoobar ee 2018, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxa ay lasoo wareegtay maareynta 24 iskuul ee ku yaalla Muqdisho. Somali Public Agenda waxa ay baaritaan ku sameysay xaaladda iskuullada ay dowladdu maamusho. Intii u dhexeysay 9-kii Febraayo ilaa 10-kii Abriil ee sanadkan 2019, cilmibaarayaal ayaa booqday ilaa lix kamid ah 24-ka iskuul waxana ay wareysi la yeesheen ilaa 22 qofood oo ay kamid yihiin maamulayaal iskuul, macallimiin, arday, agaasimayaal katirsan Wasaaradda Waxbarashada, khuburo waxbarasho iyo barayaal jaamacadeed.

Iskuullada dowladda ee Mudisho

Tan iyo bishii Oktoobar 2018, Wasaaradda Waxbarashada ee Soomaaliya waxa ay si toos ah u maamuleysay 24 iskuul dowladeed ee ku yaalla magaalada Muqdisho. Afar iyo toban kamid ah 24-ka iskuul ayaa qeyb ahaan waxa ay hoos tagi jireen dowladda waxana ay kamid ahaayeen iskuullada mashruuca Aada Dugsiyada. Dugsiyadan waxa ay heli jireen taageero maaliyadeed oo ka imaaneysay dhowr hay'adood oo caalami ah

Soomaaliya kama jiro manhaj qaran oo mideysan. Dugsiyada ay dowladdu maamusho waxa ay u isticmaalaan manhajka dowladda heerarka qaar. Sannadkii tagey, Wasaaradda Waxbarashada ayaa dhameystirtey manhajka fasallada 1-aad ilaa 4-aad waxa ayna buugaag u qeybisey ardayda dugsiyada hoose. Dhammaan 24-ka iskuul dowladeed ayaa dugsiga hoose u isticmaala manhajka dowladda.

Si kastaba ha noqotee, ma jiro manhaj qaran ee heerka dugsiyada dhexe. Waxaa jira manhajyo kala duwan oo laga dhigo dugsiyada dhexe (5-8). Iskuullada dowladda ayaa badankood dhiga manhajka ay soo diyaarisay UNESCO ama kan Kenya. Sida ay sheegeen masuuliyiin ka tirsan Wasaaradda Waxbarashada oo la wareystay, manhajka dugsiyadda dhexe waxaa la qorsheynayaa in la diyaariyo dhamaadka bisha Abriil ee 2019. Waxaa sidoo kale la qorsheynayaa in manhajka cusub la isticmaalo sannad dugsiyeedka 2019/2020.

Sidaas si lamid ah, waxaa jira jahwareer ka jira manhajka dugsiyada sare. Waxaa jira buugaag iskumid ah oo ay iskuullada ku yaala Benaadir, Jubaland, koonfur Galbeed, Galmudug, iyo Hirshabelle isticmaalaan. Buugaagtan (9-12) waxaa la isticmaalayey tan iyo sanadkii 2014. Dowladda Federaalka ayay u suuragashay in ay qaaddo imtixaanno qaran oo loogu talagalay ardayga dhameeynaya dugsiga sare lagasoo bilaabo sanadkii 2015, taas oo ay sababtay in casharro iskumid ah ay dhigayeen dugsiyada sare. Wasaaradda waxbarashada ayaa qorsheynaysa in ay dhameystirto manhaj qaran oo dugsiyadda sare ah sanadka 2020.

Iskuullada ay dowladdu maamusho ayaa ah kuwo lacag la'aan ah dhammaan fasallada kala duwan. Tan ayaa la micno ah in 24-ka iskuul dowladeed ee Muqdisho ay yihiin iskuulladii ugu horreeyay muddo soddon sano ku dhaw oo ay dowlad maamusho kuwaas oo lacag la'aan lagu dhigto, ardayda oo dhanna u furan.

Ardayda

Trada ardayda dhigata iskuullada dowladda ee Muqdisho ayaa qiyaastii ah 16,760 sida ay muujinayso tirakoob ay dowladdu sameeysay bishii Janaayo 2019. Waxaa iyadana dhiirrigelin mudan in ku dhawaad kala bar ardayda (7,601 ama 45 boqolkiiba) ay yihiin dheddig, halka 9,159 ama 55 boqolkiiba ay yihiin lab. Iskuullada qaar ayaa ardayda ugu badan yihiin dumar. Iskuul ku yaalla degmada Howlwadaag ayaa waxaa dhigta 540 arday; 312 ayaa dheddig ah halka 225 kalena ay yihiin lab. Iskuul kale oo ku yaala degmada Waaberi oo ay dhigtaan 712 ayay ardaydu jinsi ahaan yihiin kuwo isla'eg – 360 lab iyo 352 dheddig.

Diiwaangelinta ardayda cusub waxa ay u korortay si xowli ah. Is-qorista ayaa furneyd bishii Diseembar 2018. Iskuul ku yaala degmada Howlwadaag ayaa waxaa is diiwaangeliyey ilaa 300 oo arday cusub. 150 arday cusub ayaa ku biiray iskuul ku yaalla degmada Wadajir. Iskuullada dowladda ayaa furasado qaali ah u abuuray arday badan oo ay ku bilaabaan ama kusii wataan waxbarashadooda. Si kastaba ha ahaatee, isdiiwaangelinta ayaa muujineysa in arday badan ay saf u geli doonaa isdiiwaangelinta bisha Juun iyo Luulyo ee sannadkan marka la furayo diiwaangelinta sannad dugsiyeedka 2019/2020. Baahida loo qabo waxbarasho dowladeed oo lacag la'aan ah waxa ay ka badan tahay awoodda iskuullada ay dowladdu maamusho, kuwaa oo hadda waxbarasho siiya arday ku dhow 17,000 oo kunool Muqdisho.

Sare-u-kaca ku yimid diiwaangelinta ardayda micnaheedu ma ahan in arday badan oo sabool ah iyo barakacayaasha islamarkaana gaarey da'dii waxbarashada ay heleen fursad ay ku aadaan iskuullada. Inta badan ardayda dhigata iskuullada aan booqannay ayaa kasoo jeeda qoysas awoodi kara in ay lacagta iskuulka iska bixiyaan. Tan ayaa loo micneyn karaa in waalidiinta iyo caruurta kasoo jeeda qoysaska saboolka ah aanay war u heynin jiritaanka waxbarasho lacag la'aan ah. Si kastaba ha ahaatee, in caruurta kasoo jeedda qoysaska saboolka ah oo aan awoodin in ay lacagaha iskuullada gaarka loo leeyahay iska bixiyaan helaan waxbarsho aasaasi ah waa in mudnaan la siiyaa marka la diiwaangelinayo ardayda cusub ee sanad dugsiyeedka soo socda.

Macallimiinta

Sida ay muujineyso qiimeyntii ugu dambeysay ee Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha, iyo Tacliinta Sare sameysay bishii Janaayo ee sannadkan, 735 isugu jira macallimiin iyo maamulayaal ayaa ka shaqeeya 24-ka iskuul dowladeed ee ku yaalla Muqdisho. 525 (71 boqolkiiba) kamid ah waa lab halka 210 (29 boqolkiiba) ay yihiin macallimiin dheddig ah. Waxaa jira 200 oo macallimiin dheeri ah kuwaasoo ay dowladda federaalka u shaqaaleysiisay iskuullo ku yaalla Jubaland, Koonfur Galbeed, Hirshabeelle iyo Galmudug, waxana 50 macallin loo qoray dowlad goboleed kasta. Dhammaan (935-ta macallin) waxa ay mushaar ka qaataan dowladda waxa ayna mushaarka loogu diraa akoonkooda bangi oo ay gaarka u leeyihiin. Inta u dhaxeysa 30 ilaa 40 maamulayaal iyo macallimiin ayaa ka shaqeysa iskuul waliba. Tirada howlwadeennada ayaa ku xeran ardayda iskuullada. Tusaale ahaan, iskuul ku yaalla degmada Wadajir oo ay dhigtaan arday gaareysa 1,235 ayaa waxaa ka howlgala macallimiin iyo maamulayaal gaaraya 40, halka iskuul ku yaalla degmada Howlwadaag oo ay dhigtaan arday gaareysa 685 ay ka shaqeyaan 30 macalimiin iyo maamulayaal ah. Marka la eego maamulka iyo macallimiinta, dumarka waxa ay ku leeyihiin kaalin muuqata. 6 kamid ah 24-ka iskuul ee Muqdisho ku yaalla waxaa maamule ka ah dumar, waana wax aad ugu yar iskuullada sida gaarka ah loo leeyahay.

Hab-raaca shaqaaleysiinta ee macalimiinta iskuullada ayaa ah mid aan isku mid ahayn. Waxaa jira macallimiin ka badan 200 oo horey loogu shaqaaleysiiyey 14-kii dugsi ee barnaamijka Aada Dugsiyada (Go-to-School). Waxaa jira macallimiin horey uga shaqeynayey 10 dugsi oo Muqdisho ku yaalla oo ay dowladdu la wareegtay bishii Oktoobar 2018 markii horena u shaqeynayey sida iskuullada gaarka loo leeyahay. Macallimiinta iskuulladan waxaa laga dalbadey in ay soo gudbiyaan CV-yadooda waxa ayna buuxiyeen foom loo qeybiyey. Dowladda federaarlka ayaa sidoo kale xayeysiisey fursado macallimiin la qaadanayo sanadkii 2018. Boqollaal ayaa soo codsatey gashayna imtixaanka. Tartamayaasha ayaa looga baahnaa in ay ka gudbaan ugu yaraan 5 kamid ah 7 maaddo. Wasaaradda waxa ay ugu dambeyn shaqaaleysiisey 300 oo macallin. Balse 100 ka mid ah ayaa laga shaqaaleysiiyey dugsiyada ku yaalla Muqdisho. Sida aan kor

ku xusnay, 200 oo macalimiin ayaa loo kala qeybiyey dugsiyo ku kala yaalla maamul goboleedyada Jubaland, Koonfur Galbeed, Hirshabeelle, iyo Galmudug. Inkastoo in ka badan 700 oo macalimiin ah oo Muqdishu ku sugan ay mushaar ka qaataan dowladda federaalka, haddana Wasaaradda Waxbarashada ayaa shaqaaleysiisay 100 kaliya. Marka lagasoo tago hababkan kala duwan ee la maray, shaqaaleysiinta macalimiinta ayaa ah mid aan dhameystirneyn. Midda koowaad, macallimiinta ma aysan saxiixin wax heshiis ah kamana war hayaan muddada ay ku eg tahay shaqadooda. Midda labaad, maadaama ay macalimiintu dowladda ka helaan mushaar, looma aqoonsana in ay yihiin shaqaale dowladeed oo lama siinin kaarka aqoonsiga shaqada ee dowladda.

Dhammaan macallimiinta waxaa ay dowladdu siisaa mushaar isku mid ah –$322 bil kasta marka laga jaro canshuurta. Dowladda federaalka ayaa bixisa qeybta ugu weyn ee mushaarka. Bangiga Adduunka ayaa ku tabarruca qeyb kamid ah mushaarka. Sida ay noo sheegeen masuuliyiin ka tirsan Wasaaradda Waxbarasahada, qiyaastii 240 macallin ee ka shaqeeya iskuullada dowladda ayaa waxaa qeyb kamid ah mushaarkooda ($100) ka helaan Bangiga Adduunka taasoo qeyb ka ah mashruuca Aada Dugsiyada. Tan ayaa la micno ah in macalimiinta qaar ay mushaar buuxa ka helaan dowladda halka qaarka kalena ay mushaarka ka helaan labo dhinac: Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ($222) iyo Bangiga Adduunka ($100). Maamulayaasha iskuullada ayaa bil waliba mushaar ahaan u hela $400.

Mushaar bixinta waxa ay leedahay dhowr cilladood. Midda koowaad, hannaanka mushaar bixinta ayaa ah in dhammaan macallimiinta ay helayaan mushaar isku mid ah, iyadoo aanan loo eegeynin heerka waxbarasho iyo khibradda qofku leeyahay. Midda labaad, macallimiinta waxaa loo oggol yahay kaliya in ay shaqeeyaan hal gelin. Haddii macalinku rabo in uu shaqeeyo labada gelin, sida caadiga ka ah iskuullada gaarka loo leeyahay, nidaamka dowladda uma oggolaanayo in uu qofku qaato labo mushaar. Midda saddexaad, iskuullada ma lahan miisaaniyad ay ku daboolaan mushaarka haddii uu dib-u-dhac ku yimaado. Mararka qaar bixinta mushaaraadka ma ahan mid joogto ah. Macallin ayaa yiri, “mushaarka bishii Oktoobar 2018 waxa aan helnay 17-ka Nofeembar, mushaarka Nofeembar-na waxa aan helnay 11-kii Diseembar 2018”. Mushaarka bisha Janaayo ayaa sidoo kale la bixiyey horraantii bishii Maarso. Tan ayaa culeys ku ah macalimiin badan aan haysan ilo kale oo dhaqaale kasoo galo waxana ay ku tiirsan yihiin mushaarka ay ka qaataan iskuulka.

Midda afaraad, saacadaha shaqo ee macallimiinta ayaa kala duwan. Tusaale ahaan, macallimiin wax ka dhigta iskuul ku yaal degmada Howlwadaag ayaa leh xiisad ay nastaan maalin waliba iyo maalin ay fasax yihiin isbuuca; waxaa laga rabaa in ay 20 xisadood isbuucii dhigaan. Balse xaalku sidaa waa ka duwan yahay iskuullada ku yaalla degmooyinka Wadajir, Kaaraan iyo Waaberi. Macalimiinta ayaa ka cabanayay nasiino la’aan. Tan ayaa u muuqata in ay tahay xaalad ka dhalatay macallimiinta oo aanan si siman loogu qeybinin iskuullada. Waxa ay muujineysaa in loo baahan yahay in la mideeyo saacadaha shaqada macallimiinta oo qaadata mushaar iskumid ah.

Midda shanaad, maqnaashaha macallimiinta ayaa ku badan iskuuladda qaar. Maamulayaasha dugsiyadda ayaanan awood u laheyn in ay macalimiinta ka jaraan mushaaraadkooda marka aanay shaqeynin maadaama macallimiinta ay mushaarka ka helaan Wasaaradda Maaliyadda oo ugusoo dirta akoonnadooda shakhsiga ah. Kormeeridda iyo dabagalka saacadaha shaqo ee macallimiinta ayaanan xoogganeyn. Maamulayaasha iskuulladda ayaa shirar ay kala qeyb galeen howlwadeennada Wasaarada Waxbarashada cabasho ka jeediyay, balse weli waxba lagama qabanin. Ugu dambeyntii, maadaama aanay jirin heshiis ay saxiixeen macallimiinta ama siyaasad la xiriirta xuquuqda macallinka, macallimiintana aanay kamid ahayn shaqaalaha rayidka ah, arrimaha la xiriira xuquuqda shaqaalaha sida fasaxyada jirrada, dhalmada, iyo fasaxa sanadka ma ahan kuwo qeexan.

Waxaa jira farqi u dhexeeya macallimiinta ka shaqeeya iskuullada dowladda iyo kuwa ka howlgala iskuullada gaarka loo leeyahay. Kow, mushaarka ay macalimiinta iskuullada dowladda ku qaataan hal galin wuu ka badan midka ay qaataan macalimiinta u shaqeeya iskuullada gaarka loo leeyahay. Inkastoo mushaarka ay bixiyaan iskuullada gaarka loo leeyahay uu kala duwan yahay, way yartahay in ay $322 mushaar ah hal gelin ku siiyaan macallimiinta. Labo, macallimiinta iskuullada dowladda kuma tiirsana lacagaha ardayda, halka macallimiinka iskuullada gaarka loo leeyahay ay ku tiirsan yihiin. Arrintan ayaa la micna ah in iskuullada dowladda aanay arday tiro badan isugu geynin fasallada halka iskuulada gaarka loo leeyahay ay sameeyaan sabab la xiriirta lacagta kasoo galeyso. Saddex, sida ay inoo sheegeen macalimiin iyo arday aynu wareysannay, macalimiinta iskuullada dowladda ayaa ka edbin fiican ardayda dhibka badan marka loo eego iskuullada gaarka loo leeyahay maadaama ay dareemayaan in aysan ku tiirsaneyn lacag ay ardayda bixiyan.

Caqabado

Dadaalka dowladda waxa uu mudan yahay bogaadinta maadaama ay maareysay bixinta mushaaraadka macallimiinta iskuullada dadweynaha. Balse waxaa jira caqabado heysta dugsiyada dowladda ee magaalada Muqdishu. Dhismayaasha iskuullada iyo dib-u-dhiskooda waxa ay ku tiirsan yihiin deeq bixiyayaal caalami ah sida Midowga Yurub iyo hay’ado kale. Iskuullada qaar ma heystaan musqulo ku filan, nadaafaddooduna waa mid liidata. Ma jirto miisaaniyad dowladeed ee loo qoondeeyay dhisidda iyo dayactirka iskuullada.

Caqabadda ugu weyn ee heysata iskuullada ayaa ah in dowladda aysan u qoondeynin miisaaniyad kharashaadka iskuulka sida korontada iyo biyaha. Iskuullada waxaa laga mamnuucay in ay ardayda ka qaadaan wax lacag ah. Sidaa darteed, culeyska bixinta lacagta korontada iyo biyaha waxa ay saran tahay maamulayaasha iyo macallimiinta oo jeebkooda ka bixiya, sida ay inoo sheegeen macallimiin iyo maamulayaal iskuul oo aan wareysannay. Maamulayaasha iskuullada oo la kulmey shaqaalaha Wasaaradda Waxbarashada ayaa u gudbiyay culeyska saaran laakiin wax xal ah lagama gaarin. Masuuliyiinta Wasaaradda Waxbarashada oo la wareystay ayaanan lahayn qorshe cad oo ay kula tacaalaan arrinkan. Mid kamid ah masuuliyiinta ayaa sheegay in ay doonayaan in shirkadaha korontada iyo biyaha ee gaarka loo leeyahay aanay ka qaadin lacag iskuulada dadweynaha. Mid kale ayaa ka dhawaajiyay in qaar kamid ah deeqbixiyeyaasha caalamiga ah ay daneynayaan in ay ka bixiyaan kharashaadka korontada iyo biyaha iskuullada qaarkood. Masuul kale oo aan wareysannay ayaa isagana ku jawaabay in Maamulka Gobolka Banaadir uu bixiyo lacagahan.

Joogteyn iyo waaris

Miisaaniyadda dalka Soomaaliya waxa ay si weyn ugu tiirsan tahay taageero maaliyadeed oo ka timaada deeq bixiyeyaal. Mararka qaar mushaarka askarta iyo shaqaalaha rayidka ayaa soo daaha, macallimiintana waxba kama duwana shaqaalaha kale ee dowladda. Waxaa dhici karta in duruufo jiro awgood uu mushaarka soo daaho muddo bilooyin ah, xaaladdan ayaa saameyn degdeg ah ku yeelan karta tayada waxbarashada iyo sidoo kale macalinka iyo ardayda iskuullada. Sidaa darteed, iyadoo lagu dadaalayo in la xalliyo cilladaha jira, joogteeynta mushaarka hadda la bixiyo waxa ay ugu yaraan xaqiijin kartaa sii wadista howsha socota.

Soomaaliya waxa ay qaadatay nidaam federal, laakiin wadaagga awoodaha fulinta ee dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada kuma cadda dastuurka federaalka ee kumeelgaarka ah. Maqaamka magaalada Muqdisho, oo ay ku yaaliin 24-ka iskuul, weli lama caddeynin, waxana sidoo kale jira dhowr iskuul oo ay si toos ah u maamusho dowladda hoose ee Muqdisho. Sidaa darteed, ma cadda sida uu noqon doono maamulka mustaqbal ee iskuullada dowladda ee ku yaalla Muqdishu oo wakhtigan hoos taga Wasaaradda Waxbarashada. Sidoo kale, tabarta iyo awoodda Maamulka Gobolka Banaadir u leeyahay maareyna iskuullada dowladda waa mid liidata. Ka heshiinta Maqaamka Muqdishu iyo awoodda dowladda hoose ee Muqdisho u yeelan karto maareynta iskuullada dowladda ee ku yaalla Muqdisho waxa ay mustaqbalka saameyn ku yeelan karaan sida loo maamulo iskuullada dowlada ee Muqdisho.

Talooyin tixgelin mudan

Dowladda Federaalka waxa suuragal ah in ay qorsheyneyso in ay kordhiso tirada iskuullada dadweynaha ee Muqdishu oo ay maamusho, iyo sidoo kale in ay ku ballaariso maamul goboleedyada. Balse arrintan waa in loo fuliyaa si taxadar leh. Dowladda federaalka waa in ay maareynta iskuuladda dowladda u aragtaa tijaabo bilow ah kuna sameysaa qiimeyn kahor inta aanay ka fikirin balaarintooda. Waxaa jira caqabado badan oo aan xal loo helin sida mushaaraadka macallimiinta, dayactirka iskuullada, manhajka, iyo khaarashaadka soo noqnoqda.

Midda koowaad, dowladdu waa in ay qiimeysaa hormarka la sameeyay islamarkaana hagaajisaa cilladaheeda. Macalimiinta waxaa la siiyaa mushaar kabadan kuwa iskuullada gaarka loo leeyahay. Balse mishaarka waxa uu leeyahay cillado. Halbeeg waa in loo sameeyaa shaqaaleysiinta iyo mushaar bixinta macalimiinta. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la mideeyo saacadah shaqada ee macallimiinta iyo in macalimiinta si isla'eg loogu qeybiyo iskuullada. Wasaaradda Waxbarashada waa in ay u maareysaa lacagaha ka yimaada hay'adaha caalamiga ah si daahfuran. Tan ayaa fududeyn doonta in la helo kalsoonida deeq bixiyayaasha, joogteynta mushaar bixinta iyo sidoo kale bixinta kharashka soo noqnoqda.

Midda labaad, waxaa jira tira aad u badan oo isugu jira dadka tabaaleysan ee magaalooyinka ku nool iyo barakacayaal aanan awood u laheyn in ay iska bixiyaan lacagaha waxbarashada iskuullada. Qoondo ka mid ah ardeyda cusub ee la diiwaangelinayo waa in laga dhigaa agoonta, caruurta qoysaska saboolka iyo barakacayaasha. Waxaa iyadana lagama maarmaan ah in la billaabo barnaamijyo wacyigelineed oo lagu dhiirrigelinayo bulshada in dadka nugul helaan waxbarasho lacag la'aan ah. Haddii sare loo qaado diiwaangelinta ardayda kasoo jeedda qoysaska tabaaleysan iyo barakacayaasha, waxaa ay sare-u-kac ku keeni doontaa heerka akhris-qoraal ee Soomaaliya waxana ay rajo u abuuri doontaa caruur badan oo aan fursad waxbarasho helin.

Midda saddexaad, dowladda federaalka waa in ay la timaadaa qorshe ay ku maareyneyso kaabayaasha iskuullada. Miisaaniyad kooban ayaa loo qoondeyn karaa iskuul waliba si ay ugu daboolaan kharashaadka korontada iyo biyaha, nadaafadda iyo kharashaadka soo laalaabta. Inta middaas laga gaarayo, waana sida ay soo jeediyeen maamulayaal iskuullada qaar, iskuul waliba waxa uu sameyn karaa guddi waalidiin oo iyaga lacagta iskasoo aruuriyo kuna bixiyaan korontada, biyaha iyo kharashaadka kale ee soo laalaabta ee iskuul kasta. Arrintan ayaa abuureysa dareen ku aaddan in bulshadu wada leeyihiin iskuulka, waxa ayna yareynaysaa cabsida dowladda ee ku aaddan in iskuulladu ka qaadaan ardayda lacago aanay dowladdu ogeyn tiradeeda.

Ugu dambeyn, waa in macallimiinta loo sameeyaa qorshe tababar dhameystiran. Waan in la xoojiyaa aqoonta macallimiinta taasoo sare u qaadeysa tayada waxbarasho. Waxaa iyadana tixgelin mudan in la diyaariyo shuruuc ku aadan xuquuqda shaqo ee macallimiinta laguna qeexo fasaxyadooda sida fasaxayada dhalmada, jirrada, iyo sannadlaha. Waxaa taa beddelkeed la sameyn karaa in macallimiinta lagamid dhigo shaqaalaha rayidka ee dowladda oo iyagu leh nidaam lagu qiimeeyo heerka mushaarka iyo fasaxyada.

Tixraac

Cassanelli, L. & Abdikadir, F. S., 2008, Somalia: Education in Transition. Bildhaan: An International Journal of Somali Studies, 13 November, Volume 7, p. 91-125.

Federal Government of Somalia & UNICEF, 2013, GO-2-SCHOOL INITIATIVE (2013-2016): Educating for Resilience, p. 1-29.

Federal Republic of Somalia, 2019, Appropriation Act for 2019 Budget, Ministry of Finance, January.

Somali Public Agenda, 2019, Review of Somalia's 2019 budget for judiciary institutions, public services, and economic development, Somali Public Agenda, 04 March.

SOMALI PUBLIC AGENDA
Muqdisho - Soomaaliya
Email:
info@somalipublicagenda.com
Website:
www.somalipublicagenda.com
Facebook.com/somalipubagenda
Twitter: @somalipubagenda
Linkedin: @somalipubagenda
Instagram: @somaipubagenda

Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO TRANSLATIONS